
# Tallaalka dhallaanka

## jira illaa hal sanno



immunisation

the safest way to protect your child

Waxaa ku jira halkaan xog ku saabsan tallalka cusub ee cudurka meninjaytis B - xaqiiji inuu guriga kuu yaalo paracetamol-ka carruurta ka hor inta aan la gaarin ballanta cunugaaga ee tallaalka ee labbada bilood.

*Immunisation for babies - Somali*

# Hordhac

Tilmaamehaan waxaa loogu tallo galay waalidiinta leh dhalaan jira illaa hal sanno. Waxaa ku xusan xog ku saabsan tallaalada joogtada ah ee carruurta la siiyo si looga difaaco cudurrada carruurta ku dhaca ee halista ah. Waxaa sidoo kale uu sharraxayaa cuduradaas iyo sababta ay tahay in carruurtu u helaan wax ka difaaca.

Barnaamijka tallaalka si joogto ah ayaa dib loogu eegaa si loo xaqiijiyo in carruurta la siinayo badbaadada ugu wanaagsan ee cudurrada laga hortagi karo. Qoraalkaan waxaa ku xusan isbeddaladii ugu dambeeyay ee lagu sameeyay barnaamijka tallaalka. Qoraaladaan waxay ku saabsan yihiin tallaalka Meningococcal B (Tallaalka MenB) iyo muhiimada siinta paracetamol labadii kuuro oo ah tallaalka MenB ka bacdiba. **Waxaa lagaa doonayaa inaad xaqiijiso inaad heysato paracetamol-ka carruurta oo kuu yaala guriga ka hor inta aadan cunugaaga geynin tallaaladiisa ugu horeeya.** (Eeg boggaga 15–17). Waxaa sidoo kale qoraalkaan ku xusan badbaado dheeraad ah oo ka dhan ah cagaarshow (hepatitis B) qeybna ka ah DTaP/IPV/Hib/HepB (6 kuguda jira 1) tallaal oo lagu soo daray qorshaha loogu tallo galay carruurta dhashay laga bilaabo Agoosto 2017.



"Tallaabooyinka labada ah ee caafimaadka dadweynaha ee saameynta ugu badan ku leh caafimaadka dunnidda waa **biyo nadiif ah** iyo **tallaalada.**"

**Hay'adda Caafimaadka Aduunka**

**(World Health Organization)**

## Waa maxay tallaal?

Tallaal waa habka ugu wanaagsan ee ugu badbaado badan ee cunugaaga inuu xanuunsado looga illaaliyo iyo in ay cudurradda la kala qaado ku dhacaan. Dhallaanka ayaa la siiyaa tallaalo kuwaasoo jirkooda ka dhiga kuwo soo saara waxyaabo cudurrada ka difaaca. Difaaca jirka ayaa ah nidaamka dabiiciga ah ee jirka ee la dagaalama cudurada faafa. Tallaalka ayaa jirka u diyaariya sidii uu ulla dagaalami lahaa caabuqa haddii cunuga cudur uu soo wajaho.

## Waa maxay sababta aanu tallaal ugu baahan nahay?

Caalamka oo dhan, malaayiin qof ayaa u dhinta cudurro la kala qaado sannad walba. Badi cudurradaasi waxay noqdeen kuwo dhif ku ah Waqooyiga Ireland waxaana laga yaabaa inaad wax yar ka maqashay. Waxay noqdeen kuwo nadir ah maadaama tallaalka aad loo qaato tallaaladuna noqdeen kuwo cudurrada difaaca. Si kastaba ha ahaatee, waxay weli ku badan yihiin qeybo kale oo caalamka ah maadaama sidoo kalena aad loogu safro dalal kale waxaa dib loogu soo celin karaa Waqooyi Ireland waxayna ku dhici karaan cunug kasta oo aan la tallaalin.

Waa muhiim inaanu halmaamin sida cudurradaasi halis u noqon karaan. Carruurtaadu waxay halis u geli karaan caabuqyadaas waana sababta ay ugu baahan yihiin in sida ugu dhaqso badan loogu badbaadsho. Waxaa ku filan tallaalo dhowr ah cunugaaga inay si buuxda u difaacaan, marka waa muhiim in la dhammaysto barashadda. Haddii cunugaagu uusan qaadan wax tallaaladaan ka mid ah, badi dib ayuu ka qaadan karaa, xittaa haddii waqti dheer laga joogo. Weydii uun GP-gaaga ama shaqaalihii caafimaad ee ku soo booqda wax ku saabsan kuurada uusan qaadan. Ma ahan qasab inay ka soo bilaabaan kuurada bilowga.

Qaar ka tirsan cudurrada waxaa loo badinayaa inay halis ku yihiin carruurta intaa ka waaweyn–marka waa muhiim inaad xaqiijiso in la siiyo tallaalo difaaca jirkooda sare u qaada.

Haddii wax su'aalo ah aad ka qabto tallaalka, la hadal GP-gaaga, kalkaaliso tababar ku jirta ama shaqaale caafimaad oo ku soo booqda.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa www.publichealth.hscni.net ama www.nhs.uk/vaccinations

# Tallaalada dhallaanka

## DTaP/IPV/Hib/HepB vaccine (6 isku jir 1 ah)

Tallaalkaan wuxuu ka hortagaa gawracato/diphtheria (D), teetano (T), xiiq dheer ama pertussis (P), cudurka dabaysha (IPV), hargabka Haemophilus nooca b (Hib) iyo cagaarshow ama Hepatitis B (HepB).Qeybta cudurka dabeysha waxaa haatan lagu qaataa isla cirbadda beddalkii afka laga siin lahaa cunugga.

***Cunugaagu waa inuu qaato tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB (6 isku jir 1 ah) markii uu jiro labo, saddex ama afar bilood.***

Cunugaaga waxaa la siin doonaa tallaalka difaaca sare u qaada ee Hib (oo lagu daray MenC) wax yar un kaddib taariikhdiisa dhalasho ee ugu horeysa iyo tallaal difaaciisa sare u qaada oo ka hortaga gawracato, teetano, xiiqdheer iyo dabeysha ka hor inta aysan dugsi bilaabin. Waxay qaadan doonaan tallaalo sare u qaada difaacooda oo dheeraad ah oo ka hortaga teetano, gawracato iyo cudurka dabeysha markii jiraan da'da 14 illaa18 bilood.

### Sidee ayuu wax ku ool u yahay tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB (6 isku jir 1 ah)?

Daraasado ayaa muujiyay in tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB (6 isku jir 1 ah) uu aad wax ku ool u yahay dhanka ka difaacidda cunugaaga lix cudur oo dilaa ah. Si kastaba ha ahaatee, kuurooyinka sare u qaada difaaca jirka ee sare lagu soo xusay waxaa loo doonayaa inay waqtiga u dheereeyaan difaacaan inta uu cunugaagu koraayo.


### Cuduradee difaacaa tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB (6 isku jir 1)?

#### Gawracato

Gawracato waa cudur halis ah oo isla markiiba sababi kara dhibaatooyin dhanka neefsiga ah. Waxaa uu dhaawici karaa wadnaha iyo neerfeyaasha haddii uu aad u daran yahayna wuu dili karaa cunugga. Ka hor intii aan la soo saarin tallaalka gawracatada, waxaa cudurku sannad walba ku dhici jiray ilaa 1,500 oo qof gudaha Waqooyi Ireland.

#### Teetano

Teetano waa cudur xanuun badan oo asiiba murqaha wuxuuna sababi karaa dhibaatooyin dhanka neefsashada ah. Wuxuu asiibaa neerfeyaasha cunugana wuu dili karaa. Teetano waxaa sababa jeermis ciida iyo bacriminta dhexdeeda laga helo haddii uu galo jirka asagoo nabraha ka galaya iyo meelaha guban. La iskama qaado qof illaa qof laakiin mar walba ciida ayuu ku dhex jiraa xittaa dalkaan gudihiisa.



## Pertussis (xiiq dheer)

Xiiq dheer waa cudur sababi kara qofac badan iyo neef qabad asagoo neefsashada ka dhig mid adag. Wuxuu cunugga heyn karaa illaa 10 asbuuc. Carruurta yar yar aad ayuu halis ugu lahaan karaa wuxuuna xittaa dili karaa carruurta ka yar hal sanno jirka. Ka hor intii aan la soo saarin tallaalka xiiq dheerta illaa 3,500 oo qof ayuu sannad walba ku dhici jiray gudaha Waqooyi Ireland.

## Dabeyl

Cudurka dabeysha waa fayras weerara neerfeyaasha wuxuuna naafo si joogto ah uga dhigi karaa murqaha. Haddii uu asiibo murqaha xabadka ama maskaxda, cudurka dabeyshu qofka wuu dili karaa. Ka hor intii aan la soo saarin cudurka dabeysha tallaalkiisa, wuxuu cudurkaasi ku dhici jira illaa 1,500 oo qof sannad walba gudaha Waqooyi Ireland.

## Hargabka Hib

Hargabka Hib waa caabuq sababi kara jirooyin waaweyn sida sumoobida dhiigga, oof wareen iyo meninjaytis. Xanuunadaas oo dhan qofka waa dili karaan haddii isla markiiba aan laga daaweyn. Tallaalka Hib wuxuu un cunugga ka difaacaa hal nooc oo meninjaytis ah (Hib). Kama difaacdo noocyada kale ee meninjaytiska.

## Hepatitis B (Cagaarshow)

Hepatitis B waa caabuq ku dhaca beerka waxaana sababa fayraska hepatitis B. Carruurta, caabuqu wuxuu jirkooda ku jiri karaa sannado badan mararka qaarkoodna wuxuu keeni karaa dhibaatooyin caafimaad oo waaweyn sida dhaawac soo gaara beerka (cirrhosis), arrintaasoo keenta inuusan si habboon u shaqeyn ama kansarka beerka.

Inkastoo tirada carruurta cagaarshow uu ku dhacay gudaha Ingiriiska ay yar tahay, tallaalka hepatitis B waxaa la siiyay carruurta yaryar ee haliska caabuqiisa ugu jira taasoo ah inay ka qaadaan hooyooyinkood laga soo bilaabo sannadihii sideetameeyadii. 2017, tallaalka hepatitis B waxaa lagu daray barnaamij tallaal oo joogto ah si carruurta oo dhan ay uga faa'iideystaan difaaca ka dhanka ah fayraska.

Tallaalka hepatitis B wuxuu ka hortagaa nooca B ee fayraska oo saddex kuuro ayaa badbaado waqti dheer siisa carruurta ayadoo asbaab kale oo dheeraad ah oo halis ah aysan jirin.



## Waxyeelada DTaP/IPV/Hib/HepB (tallaalka 6 isku jir 1 ah)

Badi dhallaanka waxyeelo uma uu lahan tallaalkaan, laakiin dhammaan nuuneyaasha waa kuwo dadka kale ka duwan.Nuunehaaga waxaa laga yaabaa in waxyeelada soo socota ay ku dhacdo taasoo aan aad ahayn:

- Dabci xumo illaa 48 saacadood qaadata kaddib markii la tallaalo;
- Qandho fudud (eeg ka hortagga qandho daran, ka eeg bogga 16/17);
- Barar yar oo ah meesha laga duray. Taasi waxay sii jiri doontaa dhowr asbuuc kaddibna way baabi'i doontaa aayar.

Haddii aad u malayneyso in cunugaaga waxyeelo kale uu ka qaaday DTaP/IPV/Hib/HepB tallaalka (6 isku jir 1 ah )aadna walwal ka qabto arrintaa, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaaliso ku jirta tababar ama shaqaale caafimaad oo ku soo booqday.

Waalidiinta iyo dadka carruurta daryeela ayaa sidoo kale soo tebin kara waxyeelo laga shakiyay in tallaalku keenay iyo dawooyin ayagoo adeegsanaya qorshah Kaarka Cagaaran. Waxaa sidaa loogu soo gudbin karaa adoo booqanaya www.yellowcard.gov.uk ama adoo soo wacaya taleefan nambarka marwalba daaran ee qarash la'aanta ah ee 0808 100 3352 (min Isniin illaa Jimce 10.00 subaxnimo illaa 2.00 galabnimo).

### Fal-celin xasaasiyad ah

Waxaa aad naadir u ah in tallaal uu keeno xasaasiyad sida finan ama cuncun saameeya qeybo jirka ah ama dhammaan jirka oo idil.  Xittaa in sidaa ka sii naadirsan, carruurta ayaa laga yaabaa inay aad uga fal-celiyaan tallaalka xittaa daqiiqado yar gudahood, ayadoo neefsigu ku adkaado ama xittaa u suuxaan. Arrintaa waxaa lagu magacaabaa anaphylaxis (xasasiyad daran). Daraasad dhawaan la sameeyay ayaa muujisay in hal xaalad oo ah anaphylaxis la soo tebiyo markii nus milyuun qof la tallaalaba. In kastoo fal-celinta xasaasiyadu ay walaac keeni karto, daaweynteeda ayaa horseeda soo bugsoosashada buuxda ee deg-deg ah.

### Qalal

Waxaa marar dhif ah dhacda in carruurtu ay qalalaan maalin ama labo maalin kaddib markii ay qaataan tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB(6 isku jir 1ah). Taasi waxay caadiyan la xirriirtaa qandho kulul (eeg bogga 16/17). Haddii cunugaagu qalalo, isla markiiba u yeer GP-gaaga. Carruurta yaryar ayaa caadiyan si buuxda isla mar ahaantii  uga soo kabta qalalka. Dhallaanka  yar yar way qalali karaan waqti kasta marka haddii ay qalalaan markii la tallaalo kaddib waxaa laga yaabaa in arrintaasi aysan la xirriirin tallaalka. Dhakhtarkaaga ayaa go'aan ka gaari doona in cunugaagu qaadan karo kuurooyin intaa ka badan oo tallaal ah. Haddii aad dib dhigto tallaalka, waxay taasi siyaadin kartaa fursada cunugaagu qalal ku qaadayo kaddib markii lagu mudo DTaP/IPV/Hib/HepB(6 isku jir1ah) sababtuna waa in qalal ka dhasha qandho kulul uu yahay mid naadir ah 6da bilood ee nolosha ugu horeeya. Marka waa muhiim in la xaqiijiyo cunugaagu qaato tallaalka markii uu jiro da'da ku habboon.

## Tallaalka Pneumococcal(PCV)

Tallaalkaan ayaa ka hortaga mid ka mid ah asbaabaha ugu badan ee keena meninjaytis, iyo xaaladaha kale sida caabuq ba'an oo dhegaha ku dhaca *(otitis media*) iyo oof wareen ay sababaan noocyada ugu badan ee bakteeriyada *pneumococcal.* Meninjaytis, caabuq dheg ku dhaca iyo oof wareen waxaa sidoo kale sababi kara bakteeriya pneumococcal oon sidaa caan u aheyn iyo bakteeriya kale iyo fayrasyo kale. Tallaalkaan ayaan ka hor istaageyn cunugga caabuqyadaas kale.

***Cunugaagu waa inuu qaato tallaalka PCV marka uu jiro labo bilood iyo markuu gaaro afar bilood iyo wax yar kaddib dhalashadiisa koowaad.***

### Waa maxay caabuqa pneumococcal?

Pneumococcal (oo loo higaadsho new-mo-cock-al) caabuqa ah waa mid ka mid ah asbaabta ugu badan ee dhaliya meninjaytis laakin wuxuu sidoo kale sababaa caabuqyo ba'an ee dhegaha ku dhaca *(otitismedia)*, oof wareen iyo xanuuno kale.

### Waxyeelada PCV

10kii cunug ee la tallaalaba, mid ama labo ayaa barara, gaduuta ama ay jilicdaa meesha cirbada looga muday ama waxaa ku dhacda qandho aan aad aheyn. Marmar dhif ah ayaa tallaalku keenaa xasaasiyad (eeg bogga 6).



## Tallaalka Rotavirus

Tallaalkaan ayaa ka hortaga *rotavirus*, caabuq ba'an oo aalaaba ku dhaca caloosha dhankeeda hoose.

**Cunugaagu waa inuu qaato tallaalka rotavirus marka uu jiro labo bilood iyo saddex bilood.**

### Waa maxay rotavirus?

Rotavirus waa sababta caanka ah ee ku keenta mantagga iyo shubanka carruurta yar yar. Wuxuu noqon karaa halis haddii cunugga uu noqdo mid jirkiisa biyihii ka dhammaadeen waxaana laga yaabaa inuu u baahdo in isbitaal loo dhigo si loogu soo daweeyo halkaas. Wuxuu rotavirus ku dhacaa carruurta badanaa inteysan gaarin shan sanno jirka. Illaa 1 ka mid ah 5tii cunugba wuxuu u baahan doonaa daweyn caafimaad oo illaa 400 oo cunug ayaa isbitaalka loo dhigaa sannad walba gudaha Waqooyi Ireland.

### Sidee ayaa lagu kala qaadaa rotavirus?

Rotavirus wuxuu si aad u fudud ugu fidaa ayadoo si toos ah loo taabto waxyaabo sida alaabada carruurtu ku ciyaarto, gacmaha ama xafaayado. Sidoo kale hawada ayuu ku gudbi karaa marka la hindhiso ama la qufaco. Gacma dhaqashada iyo waxyaabaha oo la nadiifsho ayaa lagu dhimi karaa faafitaanka fayraskaa waxoogaa laakiin taasi si buuxda faafitaankiisa uma joojinayso.

### Sidee yahay waxtarka tallaalka rotavirus?

Caddeyn ayaa muujinaysa in habka ugu wanaagsan ee carruurta looga difaaci karo rotavirus uu yahay tallaal. Taasi waa sababta tallaalka rotavirus loo soo saaray loogana dhigay qeyb ka mid ah qorshaha tallaalka carruurnimo ee joogtada ah (laga soo bilaabo Luuliyo 2013). Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira sababo kale oo keena mantag iyo shuban oo tallaal aan lagu joojin karin.



### Goorma ayay tahay in cunugeygu qaato tallaalka?

Cunugaaga ayaa la siin doonaa tallaalka markii uu labo bilood uu jiro intaa kaddib hadana waxaa la siinayaa markii uu jiro saddex bilood waxaana lala siinayaa tallaaladiisa kale oo uu la qaadanayaa. Cunugaaga ayaa bilaabi doona kuurada tallaalka haddii uu ka weyn yahay 15 usbuuc ama wuxuu qaadan karaa kuurada xigta wixii ka dambeeya markii uu gaaro 24 usbuuc.

## Waa maxay sababta carruurta intaa ka weyn aysan u qaadan karin tallaalkaan?

Markii ay sii weynaadaanba, carruurta qaarkood –qiyaastii kunkiiba hal–waxaa ku dhacda xaalad sababta in qeybta hoose ee calooshoodu xiranto. Waa naadir wixii ka horeeya saddex bilood jirka waxaana inta badan ay asiibtaa cunugga markii da'diisu u dhexeyso shan bilood iyo hal sanno. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jirta fursad aad u yar (qiyaastii boqolkiiba kunba labo cunug ee la tallaalo) in kuurada ugu horeysa ee tallaalka ayaa waxaa sidoo kale ay sababi kartaa in xiritaankaa ay sii kororto. Si loo dhimo halista dhacdadaan, kuurada ugu horeysa ee tallaalka ayaan la siin doonin dhallaanka ka weyn 15 usbuuc jirka ah.

## Sidee tallaalka loo siiyaa cunugga?

Tallaalka rotavirus waxaa in yar oo ka mid ah asagoo dareere ah afka si fudud loogu siiyaa cunugga si uu u liqo asagoo lagu siinayo saliinge.

## Maxaa la yeelayaa haddii cunuggu soo tufo tallaalka ama soo mantago isla markii marka sidaa loo siiyo?

Tallaalka ayaa mar kale cunugga la siinayaa haddii uu soo mantago ama soo tufo.

## Miyaa tallaalku ka difaacaa carruurta xanuun ama shuban?

Maya. Rotavirus maahan sababta qura ee u keenta carruurta jirro ama shuban, marka qaar ayaa wali xanuunsan kara. Si kastaba ha ahaatee, tallaalka ayaa ka celiya sideed ka mid ah toban cunug inay mantagaan ama shubmaan dhibaatooyinkaas oo uu sababo rotavirus. Sidoo kale markii carruur badan ay qaataan tallaalkaba waxaa sii adkaata in fayrasku sii fido.

## Waxyeelada tallaalkaan

Tallaalka waxaa aad looga isticmaalaa dalal kale waana lagu badbaadaa inta la ogaaday. Caadiyan, carruurta lagu tallaalay waxaa laga yaabaa inay neysan waayaan, dabci xumi ama inuu shuban aan aad u darneyn uu ku dhaco.

Marmar dhif ah (qiyaastii labo ka mid ah boqol kun oo carruur la tallaalay ah), tallaalku wuxuu saameyn karaa qeybta hoose ee caloosha cunugga waxaana barari karta caloosha ,mantag, iyo inuu jilbaha soo laabto illaa xabadka sidii asagoo xanuun dareemaya – mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inay dhiig dhigaan. Haddii taasi dhacdo, isla markiiba waa inaad la xiriirto dhakhtarkaaga.

***Waa muhiim in la xasuusnaado in halista cudurka ka dhalata ay ka qatar badan tahay waxyeelada marmarka dhifka ah dhacda ee tallaalka.***

### Miyaa cunugeygu rotavirus ka qaadi karaa tallaalka?

Maya. Fayraska ku jira tallaalka waa la wiiqay marka ma sababo cudurka oo buuxa. Tallaalka ayaa dhisa difaaca cunugga, marka marka xiga ee fayrasku uu soo daaqillo cudurku kuma dhacaayo.

Waa macquul in fayraska ku jira tallaalka uu dad kale uga gudbo cunugga asagoo sii maraya xafaayado carro leh ugu yaraan 14 maalmood. Si kastaba ha ahaatee, tallaalida cunugga ayaa ka difaaci doonta dadkaa cudurka rotavirus, xittaa kuwa difaaca jirkoodu wiiqmay cudur ay qabaan dartood ama daawo u socota darteed, waxaana tallaalidu ka wanaagsan tahay wixii waxyeelo ah oo tallaalku keenayo.

Dhammaan dadka ka soo ag dhawaanaya carruur dhawaan la tallaalay waa inay nadaafadooda dhowraan (sida inay ku dadaalaan gacma dhaqashada kaddib markii ay meyraan xafaayada cunugga).



## Cudurka Meningococcal

Bakteeriyada Meningococcal waxay sababtaa labo caabuq oo aad u daran: **meningitis** (bararka xuubka maskaxda) iyo **septicaemia** (sumoobida dhiigga). Waxaa jira dhawr dhibaato oo kala duwan oo ay leedahay bakteeriyada meningococcal, tan ugu caansan dalkaana waa MenB. Cunugaaga waxaa la siin doonaa tallaalka MenBmarkii uu gaaro labo bilood kadibna markii uu gaaro afar bilood intaa kaddibna markii la dhaafo taariikhdiisa dhalashada ee ugu horeysa.

Waxaan u heynaa tallaal aad wax tar u leh MenC oo loogu tallo galay dhawr sanno oo carruurta jirkooda ayaa aad u qaata iyo weliba dadka waaweyn ee laakiin dhallinyarada ah waxaana horay uu u bugsiiyay caabuqa MenC, marka hadda muhiim maahan in tallaalka MenC la siiyo carruurta. Cunugaaga ayaa qaadan doona tallaalka MenC wax yar un kaddib taariikhdiisa koowaad ee dhalashada (ayadoo lalla siinayo Hib). Waxaa loo maleynayaa in tallaalka cusub ee MenB laga yaabo inuu sidoo kale bixiyo waxoogaa difaac ah oo ka dhan ah cudurka MenC.

### Waa maxay meningitis?

Meningitis waa bararida xuubka maskaxda. Arrintaan ayaa sababta cadaadis fuula maskaxda. Meningitis wuu sii kordhi karaa isla markaas ayadoo uu yeelanayo cudurkaasi calaamado halis ah ayadoo sidoo kalena uu keeni karo geeri.

### Waa maxay septicaemia?

Septicemia (sumoobida dhiigga) waa caabuq halis ah oo nafta qatar gasha oo isla markiiba  kas ii dara oo halistiisa loo galo geeri ayaa aad uga daran halista meningitis.

Wixii faahfaahin ah oo dheeraad ah oo ku saabsan meningitis iyo septicaemia ka eeg bogga 18.

### Ma la daaweyn karaa meningitis iyo septicaemia?

Haa waa la daaweyn karaa laakiin cuduradaa ayaa deg-dega oo xittaa ayadoo la daaweynayo ayaa carruurta qaba qaar waxaa ku dhaca dhaawac joogto ah qaar ayaana u dhinta.

### Miyaa laga hortagi karaa?

Haa, si guul leh ayaan uga hortageynay caabuqa MenC muddo 15 sanno ah. Hadda waxaan heysanaa tallaal cusub oo gacan ka geysanaya sidii looga hortagi lahaa caabuqyada MenB.

## Tallaalka MenB

Tallaalkani wuxuu ka hortagaa cudurka MenB, waa nooca ugu badan ee cudurka meningococcal. Sannadihii dhawaan ee la soo dhaafay waxaa jiray 50 illaa 100 qof oo caabuqa meningococcal uu ku dhacaayay sannad kasta gudaha Waqooyi Ireland, kuwaasoo badankoodu ka dhasheen MenB. Dhallaanka iyo carruurta yar yar ayaa ah kuwa uu sida aadka ah ugu dhaco.

***Cunugaagu waa inuu qaato tallaalka MenB marka uu jiro labo bilood, afar bilood iyo 12 bilood.***

### Miyaa tallaalka MenB uu leeyahay waxyeelo?

Dhallaanka qaar waxaa laga yaabaa:

- inay casaato, bararto ama jilicdo meeshii tallaalka looga muday (taasi waa ay dhammaataa kaligeed maalmo tiro yar gudahood)
- inay camal xumaadaan hamuunta cuntada ay u qabaana ay yaraato, ama
- heer kulkoodu sare u kaco (qandho).

Qandho waa fal-celin caan ah kaddib markii la siiyo tallaalka MenB. Ma ahan wax laga walwalo. Waxaad cunugaaga uga difaaci kartaa inaad siiso paracetamol kaddib markii tallaalada MenB aad siiso markii uu jiro 2 iyo 4 bilood. Eeg bogagga 14–17 si aad faahfaahin dheeraad ah u hesho taasoo ku saabsan sida arrintaa loo sameeyo. **Waa muhiim in la xaqiijiyo inaad heysato paracetamol-ka carruurta ka hor intaadan tallaalkiisa ugu horeeya aadan u wadin cunugaaga.**

### Miyay jiraan carruur ay tahay inaysan qaadan tallaalka?

Tallaalka waa inaan lasiin carruurta:

- xasaasiyada ka qaaday tallaal hore oo la siiyay (eeg bogga 6), ama
- xasaasiyad ku qaba waxyaabaha kujira tallaalka qaarkood.

### Waa sidee waxtarka tallaalka MenB?

Waxaa jira dhibaatooyin badan oo uu leeyahay caabuqa MenB, marka tallaalku wuxuu ka hortagaa badi dhibaatooyinkaa (qiyaastii todobaatan shan boqolkiiba) laakiin kama hortago dhammaan dhibaatooyinka. Haddaba wuxuu dhimaa halista cunugaagu ugu jiro inuu qaado caabuqa, laakiin waxaa jirta halis yar oo uu u gali karo inuu caabuqa qaado, marka waa muhiim wali in la ogaado calaamadaha ay tahay in isha lagu hayo – eeg bogga 18.



# Su'aalaha badi wax laga weydiiyo tallaalka

### Waqti intee dhan kadib markii la tallaalo cunugeyga ayaan dabbaal u wadi karaa?

Cunugaaga markii aad doonto ayaad dabbaal u wadi kartaa, ka hor ama kaddib tallaalka. Si lidi ku ah wax aad loo aaminsan yahay, cunugaagu uma baahna tallaal inuu qaato ka hor inta aysan dabbaal aadin.

### Miyay jiraan wax siyaabo kale ah oo cunug loo tallaalo?

Ma jiraan wax hab kale ah oo la ansixiyay oo cunug loo tallaalo. Daawooyinka wax lagu daweeyo ayaa la tijaabshay si looga hortago xiiq dheer, laakiin taasi ma shaqeyso. Guddiga Kulliyada Daaweynta (ururka diiwaan gashan ee dhakhaatiirta wax daaweynta) wuxuu kula tallinayaa waalidiinta in carruurtooda tallaalo munaasab ah lagu tallaalo.

### Miyaa haddii lasiiyo cunugeyga tallaalo dhowr ah isku mar aysan buux dhaafineyn difaaca jirkiisa?

Maya. Laga soo bilaabo waqtiga ay dhashaan carruurta difaaca jirkoodu wuxuu ka difaacaa jeermiska ku hareereysan. Haddii badbaadadaa aysan laheyn, dhallaanka uma suurta galayso inay iska difaacaan tobanaan kun oo bakteeriyo iyo fayrasyo ah oo daboola maqaarkooda, sanka, huunguriga iyo mindhicirka. Badbaadadaas ayaa socota illaa noloshooda oo dhan.

Guud ahaan, cunug wuxuu si waafi ah u qaadan karaa illaa 10,000 oo tallaal hal jeer. Marka cunugga difaaca jirkiisu wuxuu si fudud u xamili karaa tirada tallaalada sida joogtada ah loo siiyo oo qorshaha tallaalka ugu jira.

### Waxaan maqlay in thiomersal (mercury) uu ku jiro tallaalada, ma runbaa?

Thiomersal hada sebinkaan looma isticmaalo tallaalada barnaamijka tallaalka ee carruurta. Wax yar oo mercury ah ayaa in ka badan 60 sanno loo isticmaalayay in lagu keydiyo tallaalada. Waqtigaas oo dhan, ma jirin wax caddeyn ah oo ku saabsan in dhib uu keenay. Si kastaba ha ahaatee, isticmaalkiisa haatan waa la joojiyay taasoo qeyb ka ah dadaal caalami ah oo lagu dhimaayo halista loogu jiro mercury ka imaan kara illo laga baaqsan karo.

### Cunuggaygu waqtigiisii ka hor ayuu dhashay. Goorma ayaa caruurta waqtigooda kasoo hormartay la siiyaa talaalkooda ugu horeeya?

Caruurta waqtigoodii ka hor dhalatay cudurada aad ayay ugu nugul yahiin. Waa in lagu talaalo sida jadwalka talaalku sheegayo oo ah laba bilood dhalashada ka dib, si kastaba ha usoo hormareene.



## Miyay jiraan wax sababo ah oo cunugeyga aan loo tallaali kareyn?

Waxaa jira sababo aad u yar oo carruurta ay tahay in dartood aan loo tallaalin. Waa inaad ogeysiiso shaqaalaha caafimaad ee ku soo booqday, GP ama kalkaaliso tababar qabta haddii cunugaaga:

- heer kulka jirkiisu sareeyo ama uu qandhan yahay, uu mantagayo ama uu shubmayo maalinta ballanta;
- uu xasaasiyad ku qabo tallaalka;
- uu wax un xasaasiyad ku qabo;
- uu qabo cudur dhiig bax ah oo qeyru caadi ah;
- suuxitaan ama qalal;
- laga daweeyay kansar;
- uu qabo xanuun saameeya difaaca jirkiisa (sida leukaemia, HIV amaAIDS);
- uu qaadanayo daawo saameysa difaaca jirkiisa (sida kuuro badan oo ah kiimiko ama daawo la siiyo kaddib markii xubin jirkiisa ah la baddalo ama kansar laga daweynayo);
- uu qabo cuduro kale.

Tani macnaheedu mar walba maahan in cunugaaga aan la tallaali karin, laakiin waxay dhakhtarka ku caawisaa ama kalkaalisada inay go'aan ka gaadho tallaalada munaasabka ku ah cunugaaga iyo haddii ay tahay in tallooyin kale ay ku siiyaan. Cuduro soo jireen ah oo qoysku kala dhaxlo maahan sabab ay tahay inaan cunugga loo tallaalin.

## Side looga hortagi karaa heer kul sareeya tallaalka MenB kaddib?

Carruurta qaarkood waxaa laga yaabaa in heer kulka jirkoodu sare u kaco ama qandho qabato (ka sareysa 37.5°C) tallaalka kaddib. Arrintaa ayaa aad caan u ah markii la siiyo tallaalka MenB. Si arrintaas looga hortago waxaa lagu talinayaa in carruurta la siiyo saddex kuuro oo ah paracetamol-ka carruurta kaddib markii la siiyo tallaalada MenB marka ay jiraan 2 bilood iyo 4 bilood. Siinta paracetamol waxay dhintaa halista qandhada, camal xumada iyo raaxa darrida guud (sida xanuun ah halka laga tallaalay) ee tallaalkaMenB looga muday. **Waxaa muhiim ah in la xaqiijiyo inaad heysato xoogaa paracetamol-ka carruurta ah ka hor inta cunugaagu uusan qaadan tallaalkiisa ugu horeeya.** Haddii cunugaagu uu qabo qandho kaddib tallaalka saddexda bilood, waxaad sidoo kale siin kartaa paracetamol.

## Xageen ka heli karaa paracetamol-ka carruurta?

Paracetamol dareere ah waxaa aad looga helaa farmashiyeyaalka iyo suuqyada *supermarkets*-ka. Waxaad soo gadan kartaa nooc dooqaaga ah (oo raqiis ah) ama nooca Calpol®. Dhib maleh nooca aad xulato laakiin waa inaad xaqiijiso in nooc fiican aad cunugaaga u soo xusho.

## Goormaan siinayaa cunugeyga paracetamol?

Waa inaad siiso kuurada ugu horeysa markaad saa u tagto guriga, ama isla markiiba marka la siiyo tallaalka MenB. Intaa kaddib kuurada xigta sii afar illaa lix saac tan hore ka bacdi, kuurada saddexaadna afar illaa lix saac kaddib mida labaad. Ha siin kuurada ugu horeysa intaadan u keenin tallaalka, sababtoo ah kalkaalisodaadu waxay dooneysaa inay xaqiijiso in cunugaagu uusan laheyn calaamadaha caabuq jira, kaasoo mararka qaarkood noqon kara sababta loo daahinayo tallaalada cunugaaga.

## Intee in dhan ayaan siinayaa?

Kuuro kasta waa 2.5ml. dhalada aad soo gadato ama waxaa la socda saliinge ama qaado si fiican loogu cabbiro (eeg hoos).

**Kuurada iyo waqtiga sharoobada paracetamol-ka carruurta (120mg/5ml) ee loogu tallo galay in la isticmaalo tallalka kaddib markii cunuggu jiro labo bilood iyo afar bilood**

| Da'da cunugga | Kuurada 1aad | Kuurada 2aad | kuurada 3aad |
|---|---|---|---|
| 2 bilood/<br>4 bilood | Hal 2.5ml oo saliinge ama qaado lagu siinayo (dhanka yar) sida ugu dhaqso badan ee macquulka ah | Hal 2.5ml oo saliinge ama qaado lagu siinayo (dhanka yar) 4–6 saacadood kuurada hore kaddib | Hal 2.5ml oo saliinge ama qaado lagu siinayo (dhanka yar) 4–6 saacadood kuurada labaad kaddib |

**Waa muhiim in cunugaaga uu heysto saddexda kuuro ee paracetamol-ka ah ee la soo xusay oo la siinayo mid kasta labada tallaal ee ugu horeeya ee MenB kadib si loo yareeyo halista uu ugu jiro qandho inay ku dhacdo.**

Haddii cunugu soo tufo in ka badan kala bar paracetamol-kii la siiyay dhawr saacadood gudahood markii la siiyay, intaa kaddib waxaad siin kadhaa isla intii hore oo kale oo paracetamol ah isla markiiba.

## Miyay badbaado leedahay in paracetamol la siiyo cunug yar?

Haa, paracetamol waa la siin karaa carruurta jira labo bilood. Khubaro* ayaa ku talliyay in kaddib markii tallaal la siiyo cunug jira labo bilood inay badbaado leedahay in la siiyo paracetamol illaa 48 saacadood (in afar saac ugu yaraan ay u dhexeeyaan kuurooyinka qaadashadooda iyo inaan la siin afar kuuro wax ka badan maalin walba).

Sababta arrintan ayaa ah in wixii qandho ah oo meel dhexaad ah oo waqtigaa dhacda tallaalada kaddib tallaalku sababay ee caabuq uusan sababin paracetamol-kuna uu cunugaaga bugseyn doono. Qaar ah baakadihii hore ee paracetamol-ka waxaa laga yaabaa inay la jirto tallo kale laakiin baakadaha cusub waa la cusbooneysiiyay talladaan ayaana la socota taasoo ay tahay in la raaco.

*Talo khabiir oo ka socota Guddiga Guud ee Tallaalada iyo Guddiga Daawooyinka Baniaadamka.

## Maxaa la sameynayaa haddii qandho cunuga sii heyso kaddib markii la siiyo saddexda kuuro ee paracetamol-ka?

Dhallaanka qaarkood way qandhan karaan markii la tallaalo xittaa kaddib markii la siiyo paracetamol. Haddii cunugaaga weli qandho heyso kaddib markii la siiyo saddexda kuuro ee hore ee paracetamol-ka laakiin inuu fiicnaado maahee waa inaad u sii wado paracetamol-ka illaa 48 saacadood tallaalka kaddib. Mar walba waa inaad afar saacadood u dhexeysiiso kuurooyinka weligaana maalin qura ha siin wax ka badan afar kuuro. Cunugaagana waxaad ku qaboojin kartaa inaad ka siibto dharka badan ama inaadan buste weyn huwiso, iyo inaad dareereyaal badan siiso.

**Haddii cunugaaga aad walwal ka qabto waqti kasta marka garashadaada aamin oo la hadal GP-gaaga.**

**Haddii 48 saacadood kaddib tallaalka cunugu weli qandhan yahay, amase aad adigu walal ka qabto caafimaadkiisa, waa inaad la hadasho GP-gaaga si aad tallo uga hesho.**

## Garashada iyo daaweynta qandhada

Haddii wajiga cunugaagu kulul yahay markii la taabto uuna cas yahay ama gaduudan yahay, waa qasab inuu qandhan yahay. Waa inaad garato meesha heer kulka jirkiisu marayo adoo isticmaalayo *thermometer* (qandho ka sareysa 37.5°C).

Qandho wey ku badan tahay dhallaanka iyo carruurta. Waxaa badanaa ay ka qaadaan qandhada caabuqyo. Caadiyan qandho waxay sababi kara in cunugu qalal qaado. Qandho kasta ayaa qalal sababi kara, haddii qandhadu ka dhalatay caabuq iyo haddii tallaal ay ka dhalatay intaba. Marka waa muhiim inaad ogaato waxa ay tahay inaad sameyso haddii qandho cunugaaga ay qabato. Xasuusnow, qandho waxaa loo badiyaan inay sababaan cuduro ee looma badiyo in tallaal uu sababo.



## Sida loo daweeyo qandho

1. Qabooji cunugga adoo xaqiijinaaya:

   - Dhar badan inuusan gashaneyn ama buste uusan huwaneyn;

   - Qolka uu ku jiro inuusan aad u kululeyn (waana inuusan qabow aada aheyn balse uu yara qabow yahay – ilaa 16–20°C).

2. Inaad dareereyaal badan siiso.

3. Sii paracetamol carruurta (weydiiso sharoobo paracetamol ah oo aan sonkor laheyn). Markii cunugaagu qaato tallaalka MenB  kaasoo ka mid ah tallaalka labada bilood iyo kan afarta bilood, waxaa lagu tallo bixinayaa in cunugaaga aad siiso saddex kuuro oo paracetamol ah xittaa haddii qandho aysan ku dhicin, oo ay u dhexeyso 4 ilaa 6 saacadood (eeg bogaga 14–17). Haddii cunugaaga ay qandho ku dhacdo kaddib markii la siiyo tallaalka saddexda bilood, waxaad sidoo kale siin karaa paracetamol.

***Xasuusnow, inaad waligaa siin daawo leh aspirin carruurta ka yar 16 sanno jirka ah.***

**Wac dhakhtarka isla markaas haddii cunugaaga:**

- ay qabato qandho heer kulkeedu sareeyo (39°C ama ka sare);

- uu qalalo.

Haddii cunugaagu qabo qalal, dhinac dhinac u jiifi meel badbaado leh sababtoo ah jirkiisa ayaa laga yaabaa inay qarqaryo heyso ama jariiraco.

# Waxyaabaha lagu garto meningitis & septicaemia

Tallaalka MenB, tallaalka Hib iyo tallaalka oof wareenka ee pneumococcal ayaa ka hortaga noocyo kala duwan oo ah meningitis iyo septicaemia (sumowga dhiigga).
Waxaa jira noocyo kale oo tallaal aan loo heyn marka waa muhiim in weli isha lagu hayo calaamadaha cudurka.

Meningitis waxaa uu sababi karaa bararka maskaxda. Isla jeermiskiisa ayaa sidoo kale sababi kara sumoobida dhiigga (septicaemia). Dhallaan ama cunug qaba meningitis ama septicaemia waxay noqon karaan tacbaan saacado gudahood. Haddii aan la daaweyn, labada cudurba waxay noqon karaan kuwo aad qatar u ah. Calaamadaha hore ee meningitis waa kuwo khafiif ah unna eg kuwa dureyga ama hargabka, sida xumad daran (37.5°C iyo ka badan), walaac, mantag iyo cunuga oo diida inuu wax cuno. Si kastaba ha ahaatee, calaamadaha waaweyn ee ay tahay in la eego qaarkood waa kuwa hoos lagu liis gareeyay.

### Dhallaanka, calaamadaha waaweyn ee meningitis waa:

- oohin calaacal ah oo qeylo dheer
- carro markii la qaado
- nushnushleyda madaxa oo bararta (meel jilicsan oo madaxa ah)
- in cunugu u ekaado wax hurdeysan oo aan aad u nashaad badbeyn –ay adag tahay in la toosiyo
- jiljileec iyo tabar darro ama jirka oo adkaada ayadoo dhaqdhaqaaq carro eh uu sameeyo
- inuu diido cuntada, mantag
- maqaarka oo cadaada, dhibco dhibco midab ah yeesha ama noqda buluug
- qalalid ama suuxitaan
- xummad



calaamadaha **septicaemia** iyaganna waxaa ku jira:

- neef deg deg ah ama qeyru caadi ah
- maqaarka oo caddaada, calaamado yeesha, ama buluug noqda
- qandho iyo gacmaha iyo cagaha oo qabooba
- qarqarid
- mantag iyo wax cunid la'aan
- calaamado cas am *basali* ah oo aan cadaadis xaraa ku bi'in (samee tijaabada bakeeriga ee hoos lagu sharraxay)
- xanuun ama cuncun ka dhasha murqo xanuun ama xanuun daran oo xubnaha ama kala goysyada ah
- jiljileec
- hurdo la'aan daran



***Haddii bakeeri lagu cadaadiyo nabar septicaemic, nabarku ma ba'aayo. Waxaad nabarka ka dhex arkeysaa galaaska dhexdiisa. Haddii sidaasi dhacdo, dhaqtar cawimaad u raadi isla markiiba.***

Waa muhiim in la xasuusnaado in qof walba calaamadaha la soo xusay uusan yeelan doonin. Haddii qof yeesho qaar ka mid ah calaamadaha la soo liis gareeyay, gaar ahaan calaamado casa ma *basali* ah, dhaqso cawimaad caafimaad u raadi. Haddii aadan la xiriiri karin dhakhtarkaaga, ama aad weli ka walaacsan tahay kaddib markii tallada lagu siiyo, dareenkaaga aamin oo u dhig cunugaaga waaxda gargaarka degdega ah ee isbitaalka kuugu dhow.

carruurta inaa ka waaweyn, **kuwa baaluqay ama qaan gaaray**, calaamadaha waaweyn ee **meningitis waxaa ku jira**:

- luqunta oo adkaata (bel eeg inuu dhunkan karo jilbihiisa ama jilbihiisa uu ku taaban karo dhafoorkiisa)
- madax xanuun ba'an (taa keliya maahan sabab loo raadiyo cawimaad caafimaad)
- necbaanta nalalka aadka u ifaya
- mantag
- qandho
- inuu yahay mid hurdoonaya, uusan aad u firfircooneyn ama uu jahwareersan yahay
- nabar
- qalal ama suuxid

calaamadaha waaweyn ee **septicaemia waxaa ku jiri kara**:

- wax hurdoonaya inuu u ekaado, uusan aad u firfircooneyn, uu yahay mid damman ama jah wareersan (calaamad soo daahdo oo septicaemia leeyahay)
- xanuuno daran iyo xanuuno ah gacmaha iyo lugaha, lugaha iyo kala goysyada
- gacmaha iyo lugaha oo aad u qabooba
- qarqarid
- neefsasho degdeg ah
- calaamado cas ama *basali* ah oo aan bi'in markii la cadaadis (samee tijaabada bakeeriga ee lagu sharraxay bogga 19)
- mantag
- qandho
- shuban iyo calool xanuun

## Inteen xog badan ka heli karaa?

Hay'ada Cilmi Baarista Meningitis-ka iyo Meningitis Now labadaba waxay bixiyaan xog ku saabsan meningitis.

Soo wac taleefanka MeningitisNow ee lacag la'aanta ah 24-ka saac ee cawimaada ee ah 0808 80 10 388 ama booqo www.meningitisnow.org

Soo wac Hay'ada Cilmi Baarista Meningitis-ka nambarkeeda lacag la'aanta ah ee 24-ka saac ee cawimaada ee ah 0808 80 10 388 ama booqo www.meningitis.org

Sidoo kale waxaad dhaqtarkaaga weydiisan kartaa ama kalkaalisada tababaran ama shaqaale caafimaad oo kusoo booqday talo.



# Tallaalada la siiyo dhallaanka jira 12 illaa 13 bilood

Xog ku saabsan tallaalada soo socda waxaa lagu xusay warqada tallaalada loogu tallo galay dhallaanka wax yar kaddib taariikhda dhalashada ee ugu horeysa. Waxaa laguu soo diri doonaa warqadaan ka hor inta cunugaagu uusan qaadan tallaalada ama eeg barta internet-ka ee ah www.publichealth.hscni.net ama ha ka daahin inaad weydiiso shaqaale caafimaad oo ku soo booqday.

## Tallaalka MMR

MMR wuxuu cunugga ka difaacaa jadeeco (M), qaamow-qanshiir (M) iyo rubella (R; waa jadeecada Jarmalka).


***Cunugaagu waa inuu qaato tallaalka MMR dhalashadiisa koowaad ka dib isla markiiba.***

Cunugaaga ayaa qaadan doona kuurada labaad ee MMR ka hor inta aysan dugsiga bilaabin.

## Tallaalka Pneumococcal

Tallaalkaan waxaa mar hore looga soo hadlay bogga 7, cunugaaguna wuxuu uga baahan yahay saddex kuuro.

***Waxaa cunugaaga kuurada ugu dambeysa ee tallaalka pneumococcal la siin doonaa wax yar kaddib dhalashadiisa koowaad.***




## Tallaalka Hib/MenC

Cunugaaga ayaa u baahan doona tallaalka isku jira ee Hib/MenC si uu ugu difaaco caabuqyada meningococcal C uuna sare ugu qaado difaaciisa ka dhanka ah hargabka Haemophilius nooca b (Hib). Kuuradaa ayaa bixisa difaac muddo dheer oo cunuggu helo oo ka dhan ah labo asbaab oo keena meningitis iyo septicaemia.

***cunugaagu waa inuu qaato kuurada difaaca jirka sare u qaada ee tallaalka Hib/MenC wax yar kaddib taariikhdiisa dhalashada ee ugu horeysa.***

## Tallaalka MenB

Tallaalkaan waxaa mar hore lagu soo xusay bogga 12, cunugaaguna wuxuu uga baahan yahay saddex kuuro.

***Cunugaagu wuxuu qaadan doonaa kuurada ugu dambeysa ee tallaalka MenB wax yar un kaddib dhalashadiisa koowaad.***



# Barnaamijka Joogtada ah ee Tallaalka Carruurta

| Goormaa la tallaalayaa | Cudurada uu tallaalku ka hortago | Sida tallaalka loo siiyo |
|---|---|---|
| 2 bilood jir | Gawracato, teetano, pertussis (xiiq dheer), cudurka dabeysha, Hib iyo cagaarshow B (6 kujira 1)*<br>Caabuqa Pneumococcal<br>Caabuqa Rotavirus<br>Caabuqa Meningococcal B | Hal cirbad<br>Hal cirbad<br>Afkaa laga siiyaa<br>Hal cirbad |
| 3 bilood jir | Gawracato, teetano, xiiq dheer, cudurka dabaysha, Hib iyo cagaarshow (6 kujira 1)*<br>Rotavirus | Hal cirbad<br>Afkaa laga siiyaa |
| 4 bilood jir | Gawracato, teetano, xiiq dheer, cudurka dabaysha, Hib iyo cagaarshow (6 ku jira 1)*<br>Caabuqa Pneumococcal<br>Caabuqa Meningococcal B | Hal cirbad<br>Hal cirbad<br>Hal cirbad |
| Wax yar kadib dhalashada koowaad | Jadeeco, qaamow qanshiir iyo rubella<br>Caabuqa Pneumococcal<br>Hib iyo caabuqa meningococcal C<br>Caabuqa Meningococcal B | Hal cirbad<br>Hal cirbad<br>Hal cirbad<br>Hal cirbad |
| Sannad walba laga soo bilaabo 2 sanno jir illaa P7 | Hargab | Sankaa looga buufiyaa ama cirbad ayaa lagula mudaa |
| 3 sanno iyo 4 bilood jir | Gawracato, teetano, xiiq dheer, cudurka dabaysha<br>Jadeeco, qaamow qanshiir iyo jadeecada Jarmalka (rubella) | Hal cirbad<br>Hal cirbad |
| Gabdhaha jira 12 illaa 13 sanno | Kansarka ilmo mareenka oo uu sababo papillomavirus noocyada 16 iyo 18 iyo xiribyada xubinta taranka ee dumarka oo ay sababaan noocyada 6 iyo 11 | Labo ama saddex cirbadood muddo lix bilood ah |
| 14 illaa 18 sanno jir | Teetano, gawracato iyo cudurka dabeysha<br>Meningococcal ACWY | Hal cirbad<br>Hal cirbad |

*Dhallaanka dhashay Agoosto 2017 waxay qaadan doonaan tallaalada gawracatada, teetanada, xiiq dheerta, dabeysha iyo tallaalka Hib.

Haddii cunugaaga aan la siin wax ka mid ah tallaaladaa, la hadal GP-gaaga ama shaqaale caafimaad oo ku soo booqday.

Haddii aad dooneyso xog dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka, booqo

www.publichealth.hscni.netamawww.nhs.uk/vaccinations

Waxaa laga soo qaatay qoraalkii ay daabacday waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee England ogolaansho ayaana mar kale dib loogu soo saaray.

Public Health Agency

**Public Health Agency**
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net

Find us on:

06/17